

Daraasada Qorshaha Waddada Rice

Waddada Rice ee u dhexaysa 8 Jidka Pennsylvania iyo Wheelock Parkway

Dulmar

Gobolka Ramsey iyo magaalada Saint Paul waxay ka shaqeynayaan sidii ay u abuuri lahaayeen aragti bulsheed oo loogu talagalay Waddada Rice ee u dhexeysa jidka Pennsylvania iyo Wheelock Parkway. Ujeedada Daraasada Qorshaha Waddada Rice waa in:

- Kor loo qaado koboca dhaqaalaha iyo maalgashiga bulshada iyada oo la bixinayo fursado ganacsi lana joogteynayo.
- La abuur deegaan soo dhawayn leh
- Kor loo qaado badbaadada dadka lugeynaya iyo baaskiileysda
- Joogteynta iyo wanaajinta adeega gaadiidka.
- La sii wado kor u qaadista badbaadada baabuurta

Hawlgelin

In bulshada si wada jir ah daraasada looga hawlgeliyo waxay muhiim u tahay guusha daraasada. Xogta laga helayo dadwaynuhu waxay mashruuca ka soo caawisay tallaabo kasta oo uu soo maray welina kaalmada way sii lahaanaysaa.

Warcelin laga soo uruurinayo Waddada Rice

Aktoobar 2019-Aktoobar 2020

La wadaagista naqshada macquulka ah

Noofeembar 2020-Juun 2021

Soo bandhigista saddexda naqshadood ee ugu sarreeya

Luulyo 2021-Aktoobar 2021

La wadaag naqshadaha la soo jeediyay

Noofeembar 2021-Diiseembar 2021

HALKAN
AYAAN
JOOGNAA

Samee jadwalka dhismaha

2022 iyo ka dib

Aaga mashruuca



I sawir!

Daraasada Qorshaha Waddada Rice

📍 Waddada Rice ee u dhexaysa 8 Jidka Pennsylvania iyo Wheelock Parkway

Naqshadda la soo jeediyay: Dariiq wadajir loo isticmaalayo



Qaybaha Muhiimka ah

- ★ Waddo 3-haad ah oo haadadkeedu yihiin 11-fuudh haadka dhexe ee laabashaduna yahay 1-fuudh
- ★ Waddo lugeed dhinac ah oo 6-fuudh ah, waddo-dhireed 6-fuudh ah
- ★ Dariiq 12-fuudh ah oo wadajir loo isticmaalayo

Mudnaanta Bulshada

- + Dhul dheeri ah oo loogu tala galay dhirta, geedaha, kuraasta dheer iyo wixii kale.
- + Dhul dheeri ah si loo sameeyo jawi degan oo nabad ah.
- + Wuxuu ku darayaa isku xirka muhiimka ah ee shabakada baaskiilka ee magaalada.
- + Baaskiiladaha iyo baabuurta ayay kala saareysaa si loo helo badbaado heer sare ah.
- + Waxay yaraynaysaa heerarka isku dhaca dadka, baabuurta iyo baaskiiladaha.
- + Waxay buuxineysaa mashruucii qorshaysnaa ee Khadka kala gudubka G.
- + Debacsanaan badan oo lagu dejinayo baarkinka wadada.

Tixgelinaha Magaalada & Gobolka

- Waxay taageeraysaa ballanqaadkii gobolka ee isku xirka gaadiidka awood walba leh.
- Isticmaalka lugta iyo baaskiiladaha oo kordhaya, taas oo waafaqaysa siyaasadda waddooyinka gobolka iyo magaalada.
- Awood dheeraada oo loo helayo barafka waddooyinka, taas oo muhiim ah siyaasadaha dayactirka ee magaalada.